

Dugsiyada Magaalada Columbus, Caafimaadka Dadweynaha/Bulshada Columbus (Columbus Public Health), Isbitaalka Guud ee Carruurta (Nationwide Children's Hospital) daawada Faayzar (Pfizer) ee ka hor tagga Caabuqa COVID-19-ban Xarumaha/Rugaha Caafimaadka ee Talaalka Xaashida Xaqiiqda

Dugsiyada Magaalada Columbus waxay iskaashi la leeyihiin Caafimaadka Dadweynaha/Bulshada Columbus (Columbus Public Health) iyo Isbitaalka Guud ee Carruurta (Nationwide Children's Hospital) si ay u siiyaan ardaydooda, da'da ah 16-ban sano iyo wixii ka weyn, fursad ay ku helaan talaalka daawada Faayzar (Pfizer) ee ka hor tagga Caabuqa COVID-19-ban.

Immisa sano jir ayaa looga baahan yahay ilmahayga si uu u qaato talaalka Caabuqa COVID-19-ban?

Talaalka Caabuqa COVID-19-ban waxaa loogu talagalay oo keliya ardayda/dadka jira 16 sano iyo wixii ka weyn. Weli looma oggolaan caruurta ka yar 16 jir.

Sidee ilmahaygu ugu qaadan karaa talaalka Caabuqa COVID-19-ban Isbitaalka Guud ee Carruurta (Nationwide Children's Hospital)?

Degmadu waxay martigalin doontaa xarumo/rugo caafimaad oo loogu tala galay Caabuqa COVID-19-ban oo bilaash ah afar goobood/aagagg oo loogu talagalay dugsiga sare ee: Beechcroft, Briggs, Independence iyo Whetstone dhammaan ardayda CCS ee buuxiya shuruudaha da'da ah. Degmadu waxay u samaysay nidaam diiwaangelin khadka tooska ah/online-ka ah qoysaska inay isdiiwaangeliyaan, bixiyaan oggolaansho, ayna doortaan waqtiga balanta ay codsadeen. Waalidiinta **doonaya inay helaan ardaygooda, da'da ah 16-ban sano iyo wixii ka weyn, ee la siiyo talaalka daawada Faayzar (Pfizer) ee ka hor tagga Caabuqa COVID-19-ban waa inay buuxiyaan foomka oggolaanshaha ka hor intaan loo oggolaan inay helaan talaalka. Fursadda ay ku helayaan talaalka gebi ahaanba waa xulasho/ikhtiyaari, waalidiintuna waxay u baahnaa doonaan inay saxiixaan kahor intaan la talaalin ardayda ka yar 18-ban sano.**

Maxaa dhacaya, haddii ay jiraan gaadiid, Dugsiyada Magaalada Columbus ma bixin doonaan haddii ilmahaygu u baahan yahay baska gaarka ah ee leh wiishka (a lift bus)?

Dugsiyada Magaalada Columbus waxay bixin doonaan gaadiidka baska jaalaha ah si ardayda loogu qaado ama looga soo qaado goobaha dugsiga maalin kasta ee ah rugta caafimaadka.



Waa maxay hab-raacyada /baratakoolada caafimaadka iyo bad-qabka loo baahan yahay?

Qoysaska waxaa laga filayaa inay sameeyaan qiimeyn caafimaad ee ardaygooda ka hor inta aysan imaan goobta HUB. Qoysasku waa inay ardayda ku sii hayaan guriga haddii ay soo baxaan mid ka mid ah astaamaha soo socda ee Caabuqa COVID-19-ban: qufac, neef-qabad ama qandho. Calaamadaha kale waxaa ka mid ah, neefsashada oo dhib noqota, dhaxan, daal, murqo ama jir xanuun, madax xanuun, dhuun xanuun, luminta dhadhanka cusub ama urta, ciriiri/cidhiidhi ama sanko oo dareera, lallabbo ama matag, shuban.

Ma loo baahan yahay in wejiga la daboolo?

Haa, weji daboolka/fool-saabka/maaskarada waa in lagu xirto/xidho markasta baska iyo inta lagu jiro goobta rugta caafimaadka ee dugsiga (ilaa ardaygu uu ka haysto warqadda ka-dhaafitaanka maaskaro ay ku jirto faylka dugsigooda uu dhigto). Ardayda waxaa la siin doonaa fool-saab/maaskaro caafimaad oo ay ku xirtaan/xidhaan goobta dugsiga.

Muxuu ilmahaygu xiran/xidhan karaa?

Ardayda qaadanaysa talaalka Caabuqa COVID -19-ban waa inay xirtaan shaati gacmo-gaaban oo si fudud ugu fududaynaysa gacanta qaybta kore.

Quraac iyo qado ma la siin doonaa ardayda?

Haa, Quraac iyo qado ayaa la bixin doonaa/la siin doonaa iyada oo qayb ka ah maalinta dugsiga caadiga ah. Ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa inay wax cunaan oo ay cabbaan biyaha kahor talaalka si looga caawiyo waxyeellooyin kasta oo ka imaan kara. Biyo, juus/casiir iyo cunno fudud oo kooban ayaa loo heli doonaa qof kasta oo aan caafimaad qabin ka dib marka la siiyo talaalka Caabuqa COVID-19-ban.

Ka waran Haddii aanan wadan/lahayn balan ama foom/warqad oggolaansho ah oo saxiixan?

Ardayda aan haysan boos-celin (reserve) ah balantooda ama kuwa aan dhoowrin/ilaaliniin balantooda oo aan haysan foomka oggolaanshaha oo dhammaystiran **looma** qaadi doono goobta rugta caafimaadka ee dugsiga **mana** awoodi doonaan inay helaan talaalkooda.

Ma la joogi karaa ilmahayga markay qaadanayaan talaalka?

Waalidiinta looma ogola inay la joogaan canugooda. Shaqaalaha taageerada ayaa ku bixin/ku siin doonaa baska dugsiga iyo goobta dugsiga.

Waa kee talaalka Caabuqa COVID-19-ban ee ay qaadan doonaan?

Ilmahaagu wuxuu qaadan doonaa talaalka Faayzar (Pfizer), oo loo oggol yahay caruurta da'doodu tahay 16-ban sano iyo wixii ka weyn. Talaalka Faayzar (Pfizer) wuxuu waxtar u leeyahay Caabuqa COVID-19-ban boqolkiiba 97%.



Sidee loo bixiyaa talaalka Faayzar (Pfizer)?

Talaalka daawada Faayzar (Pfizer) ee ka hor tagga caabuqa COVID-19-ban waxaa lagu qaadan doonaa laba kuuro/qaadasho (two doses), oo ay u dhexeyso saddex toddobaad. Waxaa la siinayaa laba kuuro/qaadasho (two doses), waxaana u dhexeeya saddex toddobaad.

Kooxda/Cohort	Rugta caafimaad: Kuurada1-aad /Clinic: 1st Dose	Rugta caafimaad: Kuurada2-aad Clinic: 2nd Dose
A	26-ka Abriil	17-ka Maajo
A	27-ka Abriil	18-ka Maajo
B	29-ka Abriil	20-ka Maajo
B	30-ka Abriil	21-ka Maajo

Waa imisa/meeqa qiimaha talaalka Caabuqa COVID-19-ban?

Ma jirto wax lacag/kharash ah oo ku baxaya talaalka Caabuqa COVID-19-ban. Majiraan wax ku saabsan macluumaadka caymiska caafimaadka oo la waydiinayo/la aruurinayo.

Qaadashada talaalka Caabuqa COVID-19-ban saameyn ma ku yeelan karaa helitaanka talaalada kale ee joogtada /caadiga ah?

Waqiga hadda la joogo Xarumaha Xakamaynta Cudurada (CDC) waxay ku talinayaan laba toddobaad inta u dhexeysa qaadashada talaalka Caabuqa COVID-19-ban iyo talaal kasta oo joogto ah. Haddii ilmahaagu dhaqso u helayo talaalada joogtada /caadiga ah, ha u-qorshaysan inaad u-qabato balanta labo toddobaad gudahood mar hadii la qaadanayo kuurada/qiyaasta koowaad ama labaad (first or second dose) ee talaalka Caabuqa COVID-19-ban.

Ma bad-baado ayuu u yahay da'yarta/dhallinyarada talaalka Caabuqa COVID-19-ban?

Talaalada Caabuqa COVID-19-ban waxay badbaado iyo waxtar u leeyihiin da'yarta/dhallinyarada iyo dadka waaweyn. Talaalka Caabuqa COVID-19-ban waxaa soo saaray bixiyey Ruqsadda oggolaanshaha Adeegsiga Deg-degga ah (Emergency Use Authorization /EUA) Dawladda Federaalka Mareykanka U.S. Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka (Food and Drug Administration/FDA). Ruqsadda oggolaanshaha Adeegsiga Deg-degga ah EUA waxay ogolaataa markii loo baahdo daawo in si deg degg ah loo isticmaalo. Hay'adda Guud ee Caruurta (Nationwide Children's) waxay siineysaa talaalka Caabuqa COVID-19-ban tiro aad u badan oo ah shaqaalaheeda iyo bukaankeeda.



Maxay saamayn /wax-yeelooyin caafimaad ku yeelan kartaa/ ku dhici karaa ilmaga?

Waxyeelooyinka saameynta caafimaad ee la soo sheegay waa sida talaalada kale waxaana ka mid noqon kara:

- Xanuun, barar iyo gaduudasho/casaan gacanta ee ah meesha aad talaalka ka qaadaday /la gaaga duray.
- Daal, madax xanuun, murqo xanuun, kala-goys xanuun, dhaxan, qandho, lallabbo iyo matag
- Waxaa jiri karta suurto galnimo yar oo talaalku ku keeni karo fal-celin keeni karta sabab daran. Dareen-celinta xasaasiyadda daran waana dhif laakiin way dhici kartaa.

Waxaan la socon/ilaalin doonnaa ilmahaaga 15-ban daqiiqo ka dib marka ay talaalka qaataan. Waxaan isha ku haynaynaa falcelin kasta oo xasaasiyadeed.

Sidee talaalka Caabuqa COVID-19-ban si dhakhso leh loogu soo saaray?

Wadashaqeyn iskaashi cilmiga ku dhisan ee aan horay loo arag, dhismaha toban sano oo cilmi-baaris ah, ayaa u oggolaaday talaalka Caabuqa COVID-19-ban inuu si dhaqso ah u bad-baadiyo bulshada. In kastoo waqtigu-ka gaaban yahay qaab dhismeedka caadiga ah. In kasta oo waqtigan uu ka-gaaban horumarka sida caadiga ah, dhammaan hababka baaritaanka/tijaabada /imtixaanka iyo heerarkuba waxay ahaayeen kuwo isku mid ah. Ma jirin wax soo gaabin ah ee habka oggolaanshaha.

Talaalka Caabuqa COVID-19-ban ma u keeni karaa ilmahaaga madhalaysnimo/dhalmo la'aan?

Ma jiraan wax caddeyn ah ama xog muujineysa talaalka Caabuqa COVID-19-ban oo madhalaysnimo/dhalmo la'aan u keena dumarka ama ragga.

Maxay tahay sababta da'yarta /dhalinta yar ay u helayaan/u qaataan talaalka Caabuqa COVID-19-ban marka aysan u xanuunsanayn Caabuqa COVID-19-ban?

Xogta ayaa muujineysa in da'yarta/dhalinyarada ay caadi ahaan ka saameyn yar yihiin dadka waaweyn ee qaba Caabuqa COVID-19-ban. Si kastaba ha noqotee /ha noqotee, qaar ka mid ah da'yarta/dhalinyarada ayaa wali si dhab ah ugu xanuunsada Caabuqa COVID-19-ban waxayna ku samaysay saameyn muddo-dheer ah. Da'yartu/dhallinyaradu waxay sidoo kale u gudbin karaan caabuqa/fayraska kuwa kale oo ay ku xanuunsan /jiran karaan.

Markuu cunugeyga qaato talaalka, ma u baahan yihiin inay raacaan tilmaamaha bad-baadada/caafimaadka Haa. Wali lama oga inta uu talaalku kaa difaacayo Caabuqa COVID-19-ban ama haddii aad weli sii faafin karto caabuqa/fayraska ka dib qaadashada talaalka. Xitaa ka dib marka aad is talaasho, waxay ku qaadan doontaa bilo difaaca jirka (ka hortagga cudurka loo qaatay talaalka iyo / ama caabuqii/ infekshinkii hore) waa in laga



dhex dhisaa bulshada ka hortagg. Sii wad dhaqidda gacmahaaga, xirashada fool-saabka/maaskarada iyo raacidda tilmaamaha kala fogaynta bulshada (kala fogaansho massafo dhan lix cagood) nabad-gelyadaada iyo kuwa hareerahaaga ah.

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan talaalka

Faayzar/Pfizer?

Booqo visit [https://www.pfizer.com/warka\(news\)/mowduucyada\(muhiimka_ah\(hot-topics\)/dhabta_ku_saabsan_iyo_biontech_s_Caabuqa_covid_19-ban_talaalka_ama_wac_1-800-879-3477](https://www.pfizer.com/warka(news)/mowduucyada(muhiimka_ah(hot-topics)/dhabta_ku_saabsan_iyo_biontech_s_Caabuqa_covid_19-ban_talaalka_ama_wac_1-800-879-3477). (visit https://www.pfizer.com/news/hot-topics/the_facts_about_pfizer_and_biontech_s_covid_19_vaccine or call 1-800-879-3477.)

Haddii aad su'aalo badan qabtid ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, **marka hore, la xiriir kalkaalisada caafimaadka Dugsigaaga** ama wac rugta caafimaadka Caruurta (Nationwide Children's) ee ku taalla dugsiga ee ah (614) 355-2590 **(Fiiro gaar ah: kani maahan lambar jadwal/diiwaangelin).**

